



## Waalidiinta iyo Daryeelayaasha qaaliga ah ee Dugsiga Dhexe,

Waxaan rajeyneynaa in warqadani ay si nabad leh ay idin ku soo gaari doontaan!

Ardaygaagu wuxuu dhawaan ka qaybqaatay Akadeemiyada Kalkaalayaha ee Dhallinta. Barnaamijka waxa uu ardayda dugsiga dhexe u soo bandhigayaa kalkaalismada iyada oo loo marayo hab ku dhisan madadaalo, waxqabadyo gacanta ah. Waxaan rabnaa inaan fursadan uga faa'ideysano inaan kula wadaagno muhiimada barida sayniska, farsamada, injineernimada, iyo xisaabta (STEM) ee cilmiga kalkaalismada.

Kalkaalisanimadu waa shaqo abaal-marin leh oo loogu talagalay kuwa diyaarka u ah loolan. Waxaa kale oo laga helaa mushaar tayo leh iyo fursado dhanka nololaha iyo koritaanka. Si aad u noqoto kalkaaliye wanaagsan, tayada ugu muhiimsan ee ardaygu u baahan yahay waa awoodda daryeelka. Wax kasta oo kale oo ardaygu waa uu baran karaa.

Sida daryeelka caafimaadku uu u kobcayo, kalkaalismada ayaa kusii kordheysa ku tiirsanaanta tignoolajiyada iyo horumarka sayniska. Si ay ugu guulaystaan kalkaalismada, ardaydu waxay u baahan yihiin aasaas adag dhanka maadooyinka sayniska, farsamada, injineernimada iyo xisaabta ama STEM. Waxbarashada STEM waxay ardayda u diyaarisaa muuqaalka daryeelka caafimaadka ee sida deg-dega ah isu beddelaya iyada oo ku qalabaynaysa xirfadaha ay ku gaari karaan go'aamo xog ogaal ah si ay u bixiyaan daryeel bukaan oo tayo leh.

Markaad ku dhiirigeliso ardaygaaga inuu sii wado waxbarashada STEM oo ka taageerto inay ka gudbaan caqabadaha, waxaad u diyaarinaysaa xirfad guul leh oo faa'iido u leh dhanka kalkaalinta. Intaa waxaa dheer, xirfadaha STEM ayaa baahi weyn loogu qabaa warshadaha kala duwan waxayna u furi karaan albaabo badan oo fursad shaqo oo xiiso leh.

Hoos waxaa ku xusan dhawr agab ah oo kaa caawin doona inaad taageerto ardaygaaga.

### **Agabyada**

- Daraasaduhu waxay muujinayaan ka-qaybgalka qoysku inay horumariyaan guusha ardayga, iyadoon loo eegin jinsiyadda/ qowmiyadda, fasalka ama heerka waxbarashada waalidka ([pta.org](http://pta.org)). [www.pta.org](http://www.pta.org) waxayna leedahay [agabyada qoyska oo waxtar leh](https://www.pta.org/home/family-resources) (<https://www.pta.org/home/family-resources>) si ay kaaga caawiyaan inaad taageerto guusha ardaygaaga.
- Washington STEM: Waqtiga Sheekada mashruuca STEM, <https://washingtonstem.org/sts-resources/>. [www.washingtonstem.org](http://www.washingtonstem.org) waa il kale oo laga helo ilo waxtar leh si loogu taageero ardaydaada waxbarashada STEM.
- Bogga "Noqo Kalkaaliye". (<https://www.wcnursing.org/be-a-nurse/>) ee Xarunta Washington ee shabakada Kalkaalisa ([www.wcnursing.org](http://www.wcnursing.org)) waxaa laga helayaa xoogaa macluumaad hordhac ah oo quseeya qof kasta oo tixgelinaya dariiqa xirfadda kalkaalismada.
- Ururada kalkaalisanimada ee dhaqamada kala duwan ee Gobolka Washington ayaa ah meel laga heli karo agab kale oo lagu barto kalkaaliyaasha ka soo jeeda dhaqamada kala duwan, <https://www.wcnursing.org/diversity-equity-in-nursing/wa-state-ethnic-nursing-organizations/>.

### **Waad Mahadsan tihii!**

Ka timid Akadeemiyada Kalkaalayaha ee Dhallinta